

Iska baadhidda COVID-19ka ee Nova Scotia

Is baadhitaanku wuxuu u banaanyahay cid walba oo iska dareema xanuunka. Reer Nova Scotia badankooda waxaa u banann tijaabada degdegga ah, meesha kuwa halista ugu jira cudurada qatarta ah iyo kuwa ka shaqeeya shaqooyinka qaaska ah waxaa u banana in ay isku baadhaan PCR (sheybaarka) tijaabadiisa.



PCR Testing Tijaabada PCRka

Wuxuu u banaanyahay dadka iska dareemaya xanuunka IYO kuwa qatarta ugu jira cudurada halista ah. Balan dhigo adigoo isticmaalaya is baaritaanka onlaynka ah ama wac 811. in aad BCRka isticmaali karto halkan ka eeg nshealth.ca/coronavirustesting.

Waxaad ka heli kartaa natijada PCR ka (ma qabtid, waad qabtaa iyo jawaabtu ma cadda) Haddii aad heysato kaarka caafimaadka oo aan dhicin (gobol kasta ah), aqoonsiga kaarka ardayda, ama nambar kale oo diiwaan gashan, sida siyaabahan soo socda:

Iimaylka/Farriintal	Natijoooyinka iimaylka waxa la heli karaa 24 saac maalintii. Ka hubi galkaaga "Junk" iyo "Other Inbox" natijoooyinka baaritaankaaga. Ka raadi iimaylka noreply@nshealth.ca Waa muhiim inaad iska diiwaan geliso iimaylka saxda ah (laba jeer iska hubi markaad billaabeyso is baaritaankaaga), lama bedeli karo marka lagu tijaabiyo.
Mashiin ku soo waca	Haddii aanad helin natijada iimaylka, waxa aad heli doontaa wicitaan toos ah - badanaa inta u dhaxaysa 2 p.m. iyo 5 galabnimo Haddii aad sugayso natijada, talefankaagu ha shidnaado. Wicista iswada ee "numbarka aan aqoonsiga laheyn" waxa laga yaabaa inuu muujiyo lambar aan la garanayn, magac aan la garanayn ama nambar aan la aqoon oo ka baxsan gobolka. Fadlan ka jawaab Is-wacitaanka tooska ah wuxuu isku dayi doonaa laba jeer oo ku soo waco eek a qabo talefanka ka dibna dhageyso.
Onlaynka	Si aad u hesho natijada onlaynka booqo c19results.nshealth.ca
Talefoonka	Waxaad ka heli doontaa taleefoon ka socda Hey'adda Caafimaadka Dadweynaha oo kuu sheegi doona natijadaada haddii aadan haysan kaarka caafimaadka gobolka oo sax ah ama aan laguugula soo xiriiri karin siyaabaha kale ee kor ku xusan.



Haddii ay natijadu tahay Neegatif

- gurigaaga joog haddii aad weli xanuunsantahay.
- Raac tusaalooyinka halkan ku jira nshealth.ca/i-have-covid-19-symptoms



Haddii ay natijadaadu tahay Neegatif

- Raac tusaalooyinka halkan ku jira nshealth.ca/testedpositiveforcovid
- Buuxi foomka baarista Warbixinta iyo Taageerada c19hc.nshealth.ca/self-report ama wac **1-833-797-7772** haddii aadan geli karin internetka ama aad u baahan tahay gargaar.



Haddii natijada la garan waayo

- Haddii uu xanuun ku haayo, waxaad u baahantahay in aad qabsato balan is baaritaan kale ah covid-self-assessment.novascotia.ca/en



Si aad u hesho natijoooyinka baaritaanka waxaad u baahan doontaa inaad geliso afarta nambar ee u dambeeya kaadhkaaga caafimaadka ama aqoonsigaaga. Natijoooyinka imtixaanku waxay caadi ahaan la heli karaan 1-3 maalmood gudahood. Haddii ay ka badan tahay 72 saacadood wac Caafimaadka Dadweynaha 1-844-996-0694.

Natijoooyinka baaritaanka aan la garanayn waxay ka dhigan tahay in baaritaankaagii ugu dambeeyay uusan helin natijada cad oo boositif ah AMA xun.

Waxay awoodi wayday inay si sax ah u ogaato COVID-19. Natijadu waxay noqon kartaa mid aan la garanayn haddii:

- waxaa ku haya COVID-19 laakiin baaritaankaaga waxaa la sameeyay goor hore si loo ogaado fayruska.
- **AMA** waxaad dhawaan qaaday COVID-19 oo baaritaanka waxaa lagu ogaaday xaddi yar oo fayrus ah (dhintay)
- **AMA** dhibaato ayaa ka jirtay is baaritaankaaga ama baaritaanka laftiisa.

Is baaritaanka degdegga ah

Waxaa isticmaali kara dadka xanuunka dareemaya laakiin aanan halis u aheyn cudurada halista ah.

Balan qabso adigoo isticmaalaya iska war bixinta onlaynka si aad uga soo qaadato goobaha leysku tijaabiyo qalabka is tijaabinta degdegga ah,

Ballan la'aan ka soo qaado qalabka is tijaabinta degdegga ah xafiidyada MLA iyo masxafyada buugaagta. Waxaad kaloo ka heli kartaa Access NS iyo Feed Nova Scotia dadka shaqooyinkooda isticmaala.

Warbixinta sida loo isticmaalo is baaritaanka degdegga ah waxaa laga helaa halkan nshealth.ca/coronavirus/covid-19-rapid-testing

Is baarka degdegga ah waxaa la isticmaali karaa oo kaliya haddii aad xanuun qabto. 2 neegatif oo is baarka degdegga ah oo aad iska qaadday una dhaxeeyso 48 saacadood waxaa loo qaddariyaa neegatif in uu yahay (cudurku kuma hayo).

Haddii aad noqoto boositif, booqo c19hc.nshealth.ca/self-report oo dhameystir qoraalka iyo foomka hordhaca taageerada ka caawisa si loo aqoonsado dadka u qalma am ka dheefaya daawooyinka COVID-19. Ka dib booqo nshealth.ca/testedpositiveforcovid si aad u hesho macluumaadka sida loo yareeyo faafinta fayruska.

Haddii aad u baahato iska baaridda COVID-19 safar ama shaqo daraaddeed, waxaad u baahantahay in aad booqato goobahaleysku baaro ee kiliiniga qaaska ah (nshealth.ca/coronavirus-home/i-need-covid-test-travel).

Macluumaad dheeraad ah booqo: nshealth.ca/coronavirustesting

Updated June 24, 2022

